


Kitaabka Quduuska ah ee  
loogu talo galay Carruurta  
Soo-jeedinayaa



Janno,  
Guriga  
Ilaah ee  
Qurxoon



Waxa qoray: Edward Hughes  
Waxa Tusaaleeyay: Lazarus  
Waxa dhaqan-geliyay: Sarah S.  
Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service  
email: zemendale@gmail.com  
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia  
Waxa soo saaray: Bible for Children  
[www.M1914.org](http://www.M1914.org)


BFC  
PO Box 3  
Winnipeg, MB R3C 2G1  
Canada

©2013 Bible for Children, Inc.

Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato  
qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.



Markii Ciise uu ku noolaa dhulka wuxuu xertiisa u sheegay waxyaalo ku saabsan Jannada. Waxa uu ku magacaabay "Guriga aabbahay", waxaanu sheegay inay halkaas jiraan qolal guryo badani. Waa guryo waa weyn oo qurxoon.




Jannadu waxa ay ka weyntahay oo ay ka qurux badantahay guri kasta oo ku yaalla dhulka.




Ciise wuxuu yidhi, "Waan tegi doonaa si aan meel idiinku sii diyaariyo. Oo haddii aan u tago inaan meel idiin sii diyaariyo, dib ayaan u soo laaban doonaa oo anigaa idin qaadan doona."



Ciise wuxuu tagay jannada markuu dhimashada ka sarakacay dabadeed. Xertiisii iyaga oo daawanaya ayaa Ciise sare loo qaaday, waxaana iyaga araggooda ka qarisay daruur.





**SAYIDKA LA  
JOOGAAN**

Ilaa markaas kadib,  
Masiixiyiintu waxa ay  
xasuustaan ballanqaadkii  
Ciise ee ahaa inuu soo laaban  
doono oo qaadan doono iyaga.  
Ciise wuxuu sheegay inuu si  
kedis ah u iman doono,  
wakhti ay kuwo tiro  
yari filayaan  
imaatinkiisa.



Laakiin waa sidee xaaladda  
Masiixiyiinta dhintay soo  
noqoshadiisa ka hor?

Kitaabka Quduuska ahi  
wuxuu leeyahay kuwaasi  
waxay si toosa uugu tegi  
doonaan Ciise. In jidhka  
ay ka maqnaadaani  
waxa weeyi inay  
Sayidka la  
joogaan.




**SAYIDKA LA  
JOOGAAN**




Muujintii, oo ah Kitaabka ugu danbeeya Kitaabka Quduuska ahi, wuxuu inoo sheegayaa sida Jannadu cajiibka u leedahay. Waxa ugu la yaabka badanina waa iyadoo Jannadu ay tahay guriga Ilaah.

Ilaah waxa uu joogaa meel kasta, laakiin carshigiisu wuxuu ku yaallaa Jannada.






Malaa'igaha iyo makhluuqaadka kale waxay  
Ilaah ku caabudaan Jannada. Sidoo  
kale, dhammaanba dadka Ilaah  
ee dhintay ee jannada tegayna  
sidaas ayay yeelayaan. Waxay  
Ilaah uugu heesayaan  
qasiidooyin  
Ilaah  
ammaan  
ah.



Qasiido ka mida kuwa ay ku  
heesayaani waxay leedahay  
sidan: ADIGU WAXAAD  
ISTAASHISHA INAAD  
KITAABKA QAADATO OO  
AAD SHAABADIHIISA  
FURTO; ...




... WAAYO, WAA LAGU GOWRACAY, OO  
WAXAAD ILAAH DHIIGGAAGA  
UGU SOO IIBISAY DAD AH  
QABIIL KASTA IYO AF  
KASTA IYO DAD KASTA  
IYO QURUUN KASTA.  
(Muujintii 5:9).




Bogagga uugu danbeeya Kitaabka Quduuska ahi waxa ay Jannada ku tilmaamayaan "Yerusaalemta Cusub." Waxa weeyi mid aad iyo aad u weyn, oo gidaar sarreeya ku leh dibadda.

Gidaarku waxa uu samaysan yahay dhagaxaan aad qaali u ah.




Dhagxaan qiimehoodu qaali yahay ayaa asaas u ah gidaarkan, waxaanay bixinayaan midabbo kala duwan oo indhaha soo jiidanaya. Mid kasta oo ka mida albaabada magaaladu waxa uu ka samaysan yahay luul aad u weyn!



Albaabadaas waaweyn ee luulka ka samaysan weligood lama xidhayo. Aynu tagno oo eegno meeshaasi sida ay tahay ... WOW! Jannada gudeheeda ayaa intaas aad uugasii qurux badan. Magaaladu waxa ay ka


samaysan tahay dahab khaalis u ah sida muraayadda. Xitaa dariiqu waxa uu ka samaysan yahay dahab.



Webi qurux badan oo cad ayaa ku burqanaya biyaha nolosha ee kasoo qulqulaya carshiga Ilaah. Labada dhinac ee webiga waxa ku yaalla geedka nolosha, kaasoo hore ugu oolli jiray Beer Ceeden. Geedkani waa mid gaar ah. Waxa uu dhalaalaba labo iyo toban nooc oo midho kala duwan ah, bil kastana waxa uu dhalaalaba nooc kala duwan. Caleemaha geedka noloshuna waxa ay caafimaad u yihiin quruumaha.




Jannadu iftiin uugama baahna cadceedda ama dayaxa toona. Ammaanta Ilaah ay ka buuxinaysa Jannada iftiin cajiib leh. Halkaasna weligeed ma ahaan doono wax habeen ahi.






Xitaa xayawaanka ku nool Jannada dhexdoodu waa kuwo nooc kale ah. Wakhti kasta waxa weeyi kuwo saaxiib ah. Yeyda iyo wananku waxa ay wada daaqayaan cawska. Xitaa libaaxyada xoogga waaweyni waxay cunayaan midho dibiyada oo kale ah. Ilaah waxa uu leeyahay, "Ma waxyeellayn doonaan oo ma baabi'in doonaan waxa dhammaan ku sugan buurtayda quduuska ah."




Marka aynu hareeraha eegno, waxaynu arkaynaa waxyaalo ka maqan Jannada oon lagu arkaynin. Laguma maqlayo jannada dhexdeeda ereyo cadho leh. Ma jiro qof dagaallamaya ama damaaci ahi.

Albaabadu maaha kuwo qufulan ama xidhan, waayo Jannada dhexdeeda tuugo ma jirto.



Ma jiraan beenaalayaal, kuwo dadka dila, kuwo  
awood gaara sheegt, iyo kuwo xumaanfalayaal ahi  
toona. Ma jiro Jannada dhexdeeda wax denbi ahi  
nooca uu  
doonaba ha  
noqdee.



Jannada marka Ilaah lala  
joogo ma jiraan wax oohin  
ahi. Mararka qaar dadku  
waxay u ooyaan Ilaah  
maadaama oo noloshan  
dhexdeeda ay murugo  
jirto. Laakiin Jannada  
dhexdeeda Ilaah waxa uu  
meesha ka saari doonaa  
oohinta oo dhan.




Jannada dhexdeeda dhimasho ma jirto sidoo kale.  
Dadka Ilaah waxa ay weligoodba la jiri doonaan  
Ilaah. Ma jiri doonto murugo, ma jiri doonto oohin,  
ma jiri doono xanuun.


Ma jiri doono  
bukaan, qof loo  
baroorto, iyo aas  
lagasoo qayb  
galo. cid kasta  
oo Jannada  
joogtaa waxa  
ay weligeed  
farxad kula  
jiri doonaan  
Ilaah.




Intaasoo dhan waxa kasii fiican,  
Jannadu waxay u ahaatay innamada  
yaryar iyo hablaha iyo dadka  
waaweeyn ee rumaystay Ciise  
Masiix inuu yahay Badbaadiyohooda  
iyagoo markaasna u addeecay  
isagoo ah Sayidkooda.



Jannada waxa yaalla kitaab la yidhaahdo Kitaabka Noloshaha ee Wanka. Waxa ku qoran oo ka buuxa magacyada dadka. Miyaad garanaysaa cidda magacyadoodu ay halkaas ku qorantahay? Waa dadka dhammaan isku halleeyay Ciise. Magacaagu halkaas haddaba ma ku qoran yahay?



Ereyada ugu danbeeya Kitaabka Quduuska ah ee ku saabsan Jannadu waxa weeyi casuumitaan la yaab leh. "Ruuxa iyo aroosadduba waxay yidhaahdaan, Kaalay. Oo kii maqlaana ha yidhaahdo, Kaalay. Oo kii harraadsanuna ha yimaado. Oo kii doonayaaba



biyaha  
nolosha  
hadiyad  
ahaan  
ha u  
qaato."





Janno, Guriga Ilaah ee Qurxoon


Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,  
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Yooxanaa 14; 2 Korintos 5;  
Muujintii 4, 21, 22

"Erayadaada furniinkoodu wax buu  
iftiimiyaa." Sabuurka 119:130





Dhammaad

60

60



Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Cigaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro cigaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!  
Yooxanaa 3:16

